RESET
Training and Support

# Khabiirada oo Khibradda leh: Nolosha khibradda ee Noor iyo waxbarashada ee gudaha UK

Akhriso wareysigeena aan la yeelanay ee Noor, maadaamaa uu nala wadaagaayo khibradiisa ee imaanshaha UK markii uu jirey da'da 16 iyo waxbarashada si uu u maro nidaamka dugsiga/iskuulka UK.

Waxaan la fadhiisanay Noor si aan ula hadalno, oo ah arday dib u dejin ku sameysay UK isaga iyo qoyskiisa. Wareysigeena aan la yeelanay isaga, Noor wuxuu ka hadlayaa khibraddiisa ku aadan imaatinka ee UK wax yar ka hor xiritaankii ugu horeeyay ee Covid-19, kala duwanaanshaha dugsiyada/iskuulada UK marka leesku barbar dhigo Bariga dhexe, iyo rajooyinkiisa mustaqbalka. Akhriso wareysigeena hoose ee aan la yeelanay isaga si aad wax badan ugu oggaato labadiisa sano ee ugu horeysay ee halkaan!

**Waxaad jirtay 16 markaad kow imaaneysay ee UK labo sano ka hor. Sidee dareentay markii koowaad ee aad ogaatay in halkaan dib u dejin aad ku imaan doontid?**

Waan jiifay markii waalidiinteyda ay soo wacaayeen hay'adda qaxootiga ee UN si ay u dhahaan qoyskeena waxaa loo aqoonsaday dib u dejin. Waxay ahayd 9-ka subaxnimo oo waxaan lahaa maalintaas iimtixaanka xisaabta. Aabaheyga ayaa imaaday qolkeyga si uu ii kiciyo. Wuxuu dhahay, ‘Kaalay - soo kac! Waxaan u soconaa UK!’

waxaan u maleeyay inuu kaftamaayo. Waxaan keli u maleeyay inuu dhahaayo soo kac sidaas awgeed si aan ugu daahin imtixaankeyga xisaabta, laakiin waxay noqotay run! Sida ugu dhaqsiyaha badan waxaan oggaaday inuu run sheegaayo, waxaan ku dhahay, ‘Sidee ugu dhaqsiyaha badan aan u aadi karnaa?’. Aad ayaan u faraxay. Ilmo adeeradeyda waxay dib u dejin u heleen Ameerika oo waxaan rabay sidoo kale inaan dhammeysto waxbarashadeyda, sidaas awgeed aad ayaan u faraxsanaa!

Ma aanan qabin wax cabsi ama walaacyo ah imaanshaha UK, laakiin waxay ahayd dareen aan caadi ahayn inaan ka tago asxaabteyda Suuriya iyo Jordan oo aan u

guuro waddan cusub oo aad u dheer. Dadka gadaal ugu tageysid waxay ahayd waxa ugu adag. Sidaas darteeda waxaan qabay xoogaa shacuur oo isku dhafan.

Markii koowaad oo aan ka soo tagnay Suuriya, weli waan yaraa -aad ayaan u yaraa si aan u toosiisto waxyaabo, runtii. Laakiin markaan ka soo tagay Jordan, waxaan ka soo tagay qoyskeyga iyo saaxiibadeyda, sidaas awgeed taasi way adkeyd. Nasiib wanaag weli waxaan la xariiraa saaxiibadeyda Suuriya iyo Jordan, sidoo kale waxaan ku guuleystay inaan la xariiro macalinkeyga!

Imitaanka UK, aad ayaan ugu faraxsannahay barashada luuqadda iyo sii waditaanka waxbarashadeyda. Sidoo kale runtii waxaan ku rajo weynahay hal maalin mustaqbalka ah aan awoodi doono inaan arko ilmo adeerteyda ku nool Ameerika. Waxba kama qabo haddii ay imaadaan UK, ama haddii aan aado USA. Keliya waxaan rabaa inaan arko iyaga!

**Intee ayaad ka taqaanay UK ka hor inta aadan halkaan u soo guurin?**

Ma u laheen aqoon badan oo gaar ah ee waddanka. sidoo kale kuma hadleynin runtii Ingiriisi badan. Markaan joogay Jordan, macallinka wuxuu aad noo baray xoogahoo Ingiriisi ah oo aasaasi ah – tirooyinka, maalmaha ee usbuuca – waxyaabo noocaas oo kale ah. Laakiin taasi waxay ahayd dhammaan waxa aan garanaayay, markaan halkaan imaaday, waxaan isku haystay inaan ka baranaayo luuqadda meel eber ah.

Sidoo kale markaan Ingiriisiga ku baraneynay gudaha Jordan, waxaa leesku daray Ingiriisiga Ameerika iyo Ingiriisiga Biritishka, markaan isticmaalo ereyo qaarkooda gudaha UK, dadka waxay dhihi jireen 'maya, kaasi waa ameerika!'

Waxa aan ka maqlay dadka kale oo dib loo dejiyay, waan ogaa caqabadaha luuqadda ay adkaan doonto si loo hagaajiyo bilowgii, laakiin taasi woqti ayay qaadan doontaa si ay u fududaato. Oo taasi waxay ahayd waxa dhacay. Markii hore way adkeyd, laakiin hadda waxaan dareemayaa inaan qayb ka ahay bulshada halkaan.

**Waa maxay dugsiga/iskuulka ku yaalo UK marka loo barbar dhigo iskuulka/dugsiga ku yaalo Jordan?**

Dugsiyada/iskuulada ku yaalo UK, iyo Jordan gebi ahaanba way kala duwan yihiin. Ugu horeyntii, waxaa jirta luuqadda. Jordan gudaheeda waxwalba waxaan ku baranay Carabi ahaan. Halkaan waxwalba waxaad ku baraneysaa Ingiriisi ahaan.

Mawduucyada qaarkooda way kala duwan yihiin labada waddan marka loo fiiriyo kuwa kale. Tusaale ahaan, runtii waxaan jeclahay taariikhda. Gudaha Jordan, waxaan baranay taariikhda ku saabsan ee Jordan iyo waxaan baranay waddamada Carabta. Laakiin halkaan gudaha UK, waxaad baraneysaa gebi ahaanba mawduucyo kala duwan. Waxaan go'aansaday inaan qaadanin taariikhda halkaan sababtoo ah aad bay ugu duwan tahay waxa aan horey u soo bartay Waxay qaadan lahayd runtii muddo dheer si aan u barto waxyaabo cusub. Laakiin markay timaado seyniska iyo xisaabta, aad bay isku mid u yihiin – keliya waxaa kala duwan luuqadda. Sidaas darteeda way ii fududahay inaan diiridda saaro seyniska iyo xisaabta sababtoo ah waa la kal wareejin karaa.

Qaabka baritaanka halkaan sidoo kale aad bay u kala duwan tahay. Tusaale ahaan, dugsiyada/iskuulada ku yaala waddamada Carabta iyo kuwa ku yaala Jordan, ardeyda si caadi ahaan waxay isla joogaan hal fasal iyo ka dib macallamiin kala duwan ayaa kuu imaanayaan, laakiin halkaan waa dhanka kale. Kala duwanaashaha kale waxa waaye markaad imtixaan leedahay, halkaan waxay ku siineyaan usbuuc ama labo usbuuc si aad isku soo diyaariso, Laakiin gudaha Jordan keli waxaad haysataa maalmo yar. Marka lagu daro gudaha Jordan iskuulkeyga keli wuxuu ahaa wiilasha, laakiin halkaan iskuulkeyga waa leysku dhax laban yahay.

Sidoo kale halkaan waxaad haysataa aqtiyaaro badan markaad dooraneysid maadada aad rabto inaad barato. Waad qaadan oo waad dooran kartaa maadooyinka gaarka ah ee kuu horseedi doono waxa aad rabto inaad jaamacadda ka barato. Halka inta badan waddamada Carabta , guud ahaan waxaad haysataa labo waddo: xisaabta iyo seyniska, ama dhinaca suugaanta. Qaybaha ayaa ka dib lagu dejiyay waddo walba. Waxaa sidoo kale iyaalay leyliyada guriga oo fara badan markii aan joogay Jordan ka dib halkii aan ka joogay UK.

**Waxaad u guurtay UK wax yar ka hor xiritaanka koowaad ee Covid-19. Sidee cudurka u saameeyay waxbarashadaada?**

Ka dib markaan imaaday UK, waxaan aaday iskuulkeyga usbuucii koowaad, oo ka dibna waxaan galnay xayiraadda Covid. Usbuuca ugu horeeyay way iska cadahay ma aan fahmin wax badan, laakiin macallamiinta iyo ardeyda way i caawiyeen aniga inta ay awoodi karaan. Runtii si adag ayay isku dayeen oo waxay hubiyeen inaan dareemin go'doon.

Ka dib waxay noqotay inaan ku barto guriga intii lagu jiray cudurka. Macallimiinta waxay isoo direen xariiryo badan oo kala duwan iyo warqado si ay ii caawiyaan inaan barto Ingiriisiga. Marwalba waxaan ku noolahay halku dhigga ‘weligaa ha

dhihin marnaba' tani waxay isiisay aniga riixitaan taas oo aan u baahanahay inaan ahaado qof dhiirigashan.

Hadda luuqadeyda way fiican tahay, laakiin weli waxaan u baahanahay inaan ku celceliyo. Ilaa iskuulka iyo kuliyadda, waxaan sameystay saaxiibo qaarkooda oo ah Biritish asal ahaan ka yimid Carab kuwaas oo si fiican uga hadla Ingiriisiga, laakiin Carabi badan magaranayaan. Waxaan bilownay inaan sameyno kal bedelasho oo luuqadda ah – Waxaan ku caawinaaye ayaga inay bartaan Carabiga oo iyagana waxay igu caawiyeen inaan barto Ingiriisiga.

**Hadda waxaad ku jirtaa kuliyadda. Miyaad ka fikireysaa tilaabooyinkaaga xigga?**

Haa, waxaan rabaa inaa aado jaamacad. Haddii weli aan joogi lahaa Jordan, uga badnaan fursad ayaan u heli lahaa inaan aado jaamacadda. Laakiin halkaan waa macquul. Waxaan rabaa inaan barto injineernimada, laakiin aabbaheyga wuxuu jeclaan lahaa inaan barto daawada ama farmashiye … Waxaa laga yaabaa inaan bedelo maskaxdeyda. Weli ma hubo!

Waxba kama qabo jaamacadda aan aadaayo. Waxaan codsan doonaa shan jaamacadood oo kala duwan, oo waan ku faraxsanaan doonaa inaan aado middii i aqbali doonto. Waxaan dooribadan lahaa inaan la joogo qoyskeyga oo aan la safro, laakiin ma jiraan wax jaamacado oo ii dhow, marka waxaan rabaa inaan guuro.

**Maxay muhiim u tahay Communinty Sponsorship?**

Si fiican uma qeexi karo sida aan u dareemaayo kooxda Community Sponsorship taas oo na soo dhoweeyeen, wax aad u badan ayay noo qabteen anaga. Waxaan dareemayaa in nadaamkaan caawinaayo rajo siinta qoysaska sida aniga oo kale ah oo ka dhigeysa nolosha mid aad u fudud.

Aad baan ugu faraxsanahay meesha aan joogo. Waxaan qayb ka ahay bulshada. Waan garanayaa ruux kasta, oo wayna igaranayaan aniga. Markaan arko dadka bannaanka joogaan, waan salaamaa iyaga oo anigana way i salaamaan.

**Kooxda Community Sponsorship taas oo ku soo dhoweysay hadda waxay diyaarineysaa inay soo dhoweyso qoyska labaad, iyo qoyskaaga waxay ku tabaruceen inay ka caawiyaan sida ay u degi lahaayeen. Maxaa talo ah oo aad u haysaa dhalinyarada kasta oo ku nool qoyskaas?**

Taladeyda waxay noqon lahayd in la barto luuqadda sababtoo ah tani guud ahaan waxay ka dhigeysaa nolosha mid aad u fudud. Barashada luuqadda waa mid aad u adag bilowgii, marka waxaa muuhiim inaadan quursanin oo isku dey inaad dulqaad yeelato.